

# Ku codeynta xabsiga

Diiwaanka dembigaagu MA saamaynayo xaq aad u leedahay inaad ka codayso gudaha Minnesota ILAA aad waqti xaadirkan ku xukuman tahay dembi culus mooyee aadna ku jirto xarunta asluubta. Xaq ayaad u leedahay inaad codeyso haddii aad ku jiro xilli hore ka sii deynta xabsiga (parole), seeto-dheerada (probation), lagaala socdo intaad joogto guriga ama lagu sii daayo shaqo (work release).

## Xaq ma u leeyahay?

**Si laguugu oggolaado inaad codbixiso, waxaad u baahan tahay inaad tahay:**

1. Muwaadin Maraykan ah;
2. Ugu yaraan 18 jir Maalinta Doorashada;
3. Qof degan Minnesota ugu yaraan 20 maalmood;
4. Qof aan hadda ku qaadanayn xukun culus xarunta asluubta
5. Qof AYSAN xukumin maxkamada inuu sharci ahaan codeyn karin.

Ogsoonow: Haddii aan weli dembi lagu helin oo aad xabsiga ku jiri doonto Maalinta Doorashada, iyo haddii la laalay eedeymihii hore ee dembiga culus, markaas waxaad buuxinaysaa shuruudda 4.

## Ma hubtid miyaa xaaladaada sharci?

Mararka qaarkood farqiga u dhexeeya eedeymaha dambiga culus iyo xukunka dambiga culus waa mid jahawareer leh. La hadal qareen si aad wax badan uga ogaato xaaladaada sharci.

## Horay ma isku diwaan galisay?

Haddii aad diwaan gashan tahay, oo magacaaga iyo ciwaankaaguna uusan isbeddelin, waxaad la xidhiidhi kartaa sarkaalkaaga asluubta adigoo weydiisanaya foomka ku codeynta boostada. Waxaad ku dari kartaa ciwaanka xabsiga sida ciwaanka boostada ee lagu soo diri doona foomka ku codeynta boostada. Marka uu Xafiiska Doorashooyinku helo codsigaga, foomka ku codeynta boostada ayaa laguugu soo diri doonaa xabsiga.

## Wali ismaadan diwaangelinin miyaa?

Waa inaad sidoo kale la xiriirtaa sarkaalkaaga asluubta aadna waydiisataa foomka ku codeynta boostada. Marka uu Xafiiska Doorashooyinku helo codsigaga, foomka ku codeynta boostada ayaa laguugu soo diri doonaa iyada oo ay la socoto agabyada diiwaangelinta codbixiyayaasha.

Si aad isugu diwaan geliso si guul leh, waxaad u baahan tahay ciwaan joogto ah (cinwaanka xarunta uma qalmo). Waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad taqaano lambarka laysinkaaga darawalnimada, lambarka aqoonsigaaga gobolka, ama lambarka sooshal sekiyuurigaaga.



Ka codso sarkaalkaaga asluubta foomka ku codeynta boostada. Xafiiska Doorashooyinka ee Hennepin County ayaa markaas kuu soo diri doona foomka ku codeynta boostada. Warqada codbixintu waa in lagu soo celiyaa xafiiska doorashada marka la dhameystiro.

612-348-5151 | [voteroutreach@hennepin.us](mailto:voteroutreach@hennepin.us)

Saacadaha shaqada: Isniin ilaa Jimcaha 8 a.m. – 4:30 p.m.

[hennepin.us/elections](https://hennepin.us/elections)

